

**Haddii taasi ay waxtari wayso, qiimayn darteed la xiriir
aqoonyahanka jimicsiga ilmaha buka.**



Bugani yar waxaa soo saaray Golaha Isbahaysiga farsamayaqaanada muruqgoynka/jimicsiga bukaha ee dalka Norway ee daawaynta ilmaha - iyo dhallinyarada, la cusboniisay 2013, 2017 iyo 2019, 2022. Sawirka: Marit Bjørlykke.

Tixraacyada:

1. SIDS and Other Sleep-Related Infant Death: Expansion of Recommendations for a Safe Infant Sleep Environment. Pediatrics 2011;128 (5):1341-65.
2. Shweikeh F, Nuño M, Danielpour M, Krieger MD, Drazin D. Positional plagiocephaly: an analysis of the literature on the effectiveness of current guidelines. Neurosurg Focus. 2013 Oct;35(4):E1.
3. Robertson R. Supine infant positioning- yes, but there's more to it. J Fam Pract. 2011 Oct;60(10):605-8.
4. Christensen C, Landsettle A, Antoszewski S, Blaire Ballard B, Carey H, Pax Lowes L. Conservative Management of Congenital Muscular Torticollis: An Evidence-Based Algorithm and Preliminary Treatment Parameter Recommendations. Physical & Occupational Therapy In Pediatrics, 2013; 33:4, 453-466.
5. Kaplan SL, Coulter C, Fetters L. Physical therapy management of congenital muscular torticollis: an evidence-based clinical practice guideline: from the Section on Pediatrics of the American Physical Therapy Association. Pediatr Phys Ther. 2013 Winter;25(4):348-94.
6. Helsedirektoratet (2019). Nasjonale faglige råd for fysisk aktivitet i forebygging og behandling. Tilgjengelig fra <https://www.helsedirektoratet.no/faglige-rad/fysisk-aktivitet-i-forebygging-og-behandling>

Skjevt hode og favorittside, somali utgave, 2022. Faggruppen for barne- og ungdomsfysioterapi.



Skjevt hode og favorittside Madax qalloocan iyo dhinacyada la doorbido

Markii ilmaha ay jiifaan sidii looga hortago dhimashada lamafilaanka ee dhallanka waxaa lagula talinayaa in ¹. Ilmaha dhallanka ah saacado badan ayay maalin kasta hurdan. Ilmaha qaarkood waxay jecel yihiin in ay u seexdaan iyagoo wejigooda hal dhinac ku abaaro. Ilmaha waxay badi ahaan u jeestaan dhinaca shanqarta, sida codka, wejiga ay garanayaan iyo codadka dadka. Lafaha ilmaha dhallanka ah way jilicsan yihiin waxaana qaabeeyo riixida madaxa ee jirka intiisa kale

2. . Haddii ilmaha mar kasta u jiifsadaan madaxa oo isku dhinac ah, wuxuu qaabkaas sababi karaa madax qalloocan iyo kala duwanaanshaha dhinacyada iyo farqi dhinaca dambe ah oo u dhexeeya xoogga muruqyada qoorta iyo dhaqdhaqaaqa ² . Taasoo loo yaqaano dhinaca la doorbiday.



Markii ilmaha ay soo jeedaan waa muhim booska ay u nugeeyaan sidii kor loogu qaado horumarka kartida dhaqaaqa jirka ee wanaagsan oona looga hortago dhinaca la doorbidayo. Waa muhim in ilmaha la siiyo fursad ay u jiifsadaan dhinaca caloosha, dhabarka iyo dhinacyada sidii ay ku helaan khibrado dhaqdhaqaaqa kala duwan. ³ .

Sidee baa looga hortaga madaxa iyo qoorta qalloocan?

- Ilmaha si xeeladaysan qolka dhexdiisa ugu meeleeey, marka laga eego iftiinka, ilaha dhawaaqa iyo alaabta qolka. Ilmaha sii fursad u kolba labada dhinac madaxa dhigo.
- Markii ilmaha aad jirkaaga ku sido ama aad naas-nuujinayso/cunto siinayso kolba dhinac ku meeleeey, kana beddel halka u ku meelaysana.
- Sidii cunugga u helo noocyo kala duwan iyo kicin ka dhig madaxa sariirta kolba dhinac.
- Bilowga arrin sahlan ma ahan in ilmaha u seexdan dhinaca caloosha, sidaas awgeed waxaa maalin kasta wanaagsan in qaddar yar kolba dhinac loo seexiyo, sida tusaale markii xafaayadda laga beddelayo. Kaddib kolba inyar kordhi muddada ay u jiifsadaan dhinaca caloosha.
- Markii ubadkaaga u ku sugan yahay boos usan jeclayn waxaad siin kartaa inyar oo taageero ah adigoo gacmahaaga saara miskaha ubadkaaga ama ubadkaaga ka caawina in u dhudhuntiisa hoos dhigo. Ilmaha dhallanka ah waxaa lagu dhiirigeliyaa iyadoo wejigaaga u muuqdo.
- Sida loola qabsiiyo meelaynta ugu nugulsan awgeed waxaad ubadkaaga saari kartaa calooshaada adigoo isla markaas dhinaca dhabarka u jiifo.
- Dhinac ku meelaynta waa ku meelayn heer sare ah oo ku habboon ciyaar-carruureed iyo Isdhexgalka.



Haddii madaxa ubadkaaga u qalloocdo oona u leeyahay dhinac u doorbido maxaa ka qaban kartaa?

- **Markii cunugga u hurdo** isku day inaad wejigiisa ka jeedisoo dhinaca u doorbido. Dhinaca u doorbido waxaad adigoo isticmaalayo shukumaan/buste, u dhigta sinta iyo garbaha hoostooda, sidaas ayaa miisaanka jirka oo idil ugu soo weecin kartaa dhinaca u doorbido, isagoo islamarkaas dhabarkiisa xiga dhinaca sariirta iwm.

- **Markii cunugga u soo jeedo**, ka feker bedbedelaadda dhinaca wejigiisa u jeedsan yahay ⁴.

- Markii ilmaha aad garbahaaga ku sido: Ilmaha u ximbarso qaab madaxiisa aad ka weecinayso dhinaca u doorbido .



- Cunugga u ximbarso sidii dhinaca u doorbido u kugu soo jeedsado.
- Ubadkaaga u meeleeey qaab u ugu soo jeesto dhinaca u doorbido sidii adiga ku fiirsado ama u la socdo dhaqdhaqaaqista ama codka qolka.
- Gacanta u dhig fiirgaar-siinta ubadkaaga, waxaana siisa fursad u madaxiisa ku abaaro bartamaha iyo meel ka fog dhinaca u doorbido.
- Markii adiga iyo ubadkaaga isdhexgal ama ciyaar-carruureed samaynaysaan: adiga isku meeleeey dhinaca aad doonayso in ubadkaaga u madaxiisa u soo weeciyo, hadal, dhool cadeey iyo isticmaal walxaha carruurta ku ciyaaraan, sii ubadkaaga u hab firfircoon madaxiisa jihadaada u soo jeediyo awgeed. Haddii cunugga usan awoodi karin in madaxiisa u soo jeediyo ka caawin adigoo hab xasilan gacantaada isticmaalo.
- Sidii hoos loogu dhigo muddada riixida qaybta siman ee madaxa oona murqaha la xoojiyo, waa in maalin kasta ugu yaraan saddex jeer aad ubadkaaga siiso fursad u calooshiisa ku jiifsado. ⁵.